



## (Qofkastoo idinka mida Janadu waxay uga dhowdahay suunka kabtiisa, naartuna waa la mid)

Ibnu Mascuud waxaa laga wariyey Allaha ka raali ahaadee inuu yiri: Nabigu scw wuxuu yiri: (Qofkastoo idinka mida Janadu waxay uga dhowdahay suunka kabtiisa, naartuna waa la mid).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu scw wuxuu sheegay in janada iyo naartuba u dhaw yihiin dadka sida kabaha lugta ku jira ee lagu socdo oo kale, waayo waxaa laga yaabaa in camal cibaado ah oo Ilahay jecel yahay ah la sameeyo oo janada lagu galo, ama la sameeyo macsi lagu galo naarta.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3581>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

